

Waa maxay cirbadaha Xoojinta waxtarka talaalka COVID-19?

QORAALKA

[muusik qafiif ah]

[Warin]

Kadib marka qof uu qaato talaalka buuxa, wuxuu caadiyan leeyahay difaac sareeya oo ka dhan ah COVID-19.

Xog cusub ayaa muujinaysa in difaaca ka dhanka ah caabuqa COVID-19 uu yaraanaayo muddo kadib, xataa ayadoo talaalladu wali yihiin kuwo wax badan ka taraaya yaraynta khatarta xanuun daran, in isbitaal lagu dhigo, ama dhimashada.

Marka difaaca hore ee ka dhanka ah talaalku hoos u dhaco, kuuro dheeraad ah, oo loo yaqaano cirbad xoojin ah, ayaa lasiiyaa qofka si loo kordhiyo difaaca.

Kuuradaan dheeraadka ah ayaa difaacyo badan abuuraysa si qofka looga ilaaliyo cudurka.

Qaar badan oo talaallada joogtada ah ayaa u baahan xoojiyaal si loo ilaaliyo difaaca heerka sare ah

Tusaale, dadka ayaa qaata cirbada teetanada 10 sanaba mar. Cirbadaas waa xoojiye. Waxay "xoojinaysaa" awoodaada kahortaga xanuunka sababtoo ah waxaan ognahay in difaacu sii daciifayo muddo kadib.

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan talaallada COVID-19, booqo health.mn.gov/covidvaccine.

[muusik qafiif ah]

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

10/6/21 (Somali)

Si aad u hesho macluumaadkan oo qaab ka duwan ah, wac: 651-201-4989.